

## GOORMEEN ISKU QORI KARAA?

Laanta Sharci-dejinta ee Gobolka Washington ayaa maalgelineysa kaalmadan lacagta joogtada ah ee caymiska ilaa 31-ka Dis, 2022. Waxaad isku qori kartaa waqti kasta taariikhdaasi ka hor. Laanta sharci-dejinta waxay tixgelin kartaa maalgelinta barnaamijkan wixii ka dambeeya 2022.

## SIDA LA ISUGU QORO

Haddii aad tahay shaqaalaha xarun daryeel sharciyeysan oo ku taalla meel ka mid ah Gobolka Washington, wac ama iimayl u dir la-hawlgalayaasheenna Yakima Neighborhood Health Services (YNHS) si aad wax badan u oggaato oo aadna isugu qorto. Kaaliyeyaasha tababaran ee YNHS ayaa gacan ka geysanaya go'aaminta xaq-u-yeelashada barnaamijka iyo ka hadalka dhimisyada kale ee caymiska ee laga yaabo in aad xaq u leedahay. Caawimaadda luuqadda ee bilaashka ah ayaa sidoo kale la heli karaa.

Mar hadaad isku qorto, Washington Healthplanfinder (oo ka wakiil ah Gobolka WA) ayaa bixin doonta lacagaha shirkadda caymiska ee caymiskaaga caafimaadka.



## ARAG HADDII AAD XAQ U LEEDAH

Yakima Neighborhood Health Services ayaa kaa caawin doonna go'aaminta haddii aad xaq u leedahay. Waxaad xaq u leedahay ka-qaybgalka barnaamijka haddii lagu siiyo caymiska loo-shaqeeyaha ama aad caymis ka hesho xubin kale oo qoyska ka tirsan.

Waxaad xaq u yeellan kartaa barnaamijyo kale, oo uu ku jiro caymis bilaash ah ama qiimihiiisu yar yahay oo loo marayo Washington Apple Health (Medicaid).

**Yakima Neighborhood Health Services**  
Telefoonka: **509-574-0826**  
limayl: **ccnavi@ynhs.org**



# Kaalmada Lacagta Joogtada ah ee Caymiska Daryeelka Caafimaadka

wahealthplanfinder.org  
1-855-WAFINDER | 1-855-923-4633



CONTACT  
**Yakima Neighborhood  
Health Services**  
Telefoonka: **509-574-0826**  
limayl: **ccnavi@ynhs.org**

## KU SAABSAN BARNAAMIJKA

Sannadka 2021, hay'adda sharci-dejinta gobolka Washington ayaa abuurtay barnaamij loogu talagalay shaqaalaha xarumaha daryeelka carruurta ee shatiilaha ah si ay u helaan caynsanaanta caymiska caafimaadka ee lacagtiisu tahay \$0 bil kasta. Hawlgalayaasheenna ee Yakima Neighborhood Health Services ayaa ka caawinaya xirfadlayaasha daryeelka carruurta ee Gobolka Washington go'aaminta xaq-u-yeelashada iyo caymiska.

## KUMAA U QALMA

- Fursaddan waxaa heli kara shaqaalaha:
- Ka shaqeeya xarunta daryeelka carruurta ee shatiga haysta (oo ay ku jiraan barnaamijyada daryeelka carruuta ee guriga qoyska, xarunta ku saleysan, kuwa carruurta jirta da'ada iskuulka, iyo kuwa ku saleysan dabeecadda-bannaanka)
- Haysta dakhliga reerka oo ka yar 300% ee Heerka Saboolnimada Federaalka
- Aqbala dhammaan kaalmooyinka lacagaha joogtada ah ee caymiska federaalka
- Isku qora qorshaha caafimaadka Cascade Care Silver
- Ka soo baxa shuruudaha kala ee xaq u yeelashada ee u degsan Healthplanfinder

## XAQ-U-YEELASHADA DAKHLIGA

Laanta Sharci-dejinta Gobolka Washington ayaa u degsan shuruudo dakhli oo ka hooseeya 300% ee Heerka Saboolnimada Federaalka si ay ugu qalmaan barnaamijka. Shaxda ku xusan dhanka midig ayaa muujineysa xadadka dakhliga ee barnaamijka. Kaaliyeyaasha tababaran ayaa kaa caawin doonna in aad geliso macluumaadka dakhliga saxda ah iyo kharashaadyada laga jari karo.

Qoysaska/reeraha leh in ka badan sideed shakhsi, kuddar \$13,620 shakhsi kasta/ sannadkii oo dheeraad ah.

Ogow: Waxaad awoodi kartaa in aad ka jarto kharashaad dheeri ah dakhligaaga oo kaa dhigi karta in aad xaq u yeelato barnaamijkan. La-hawlgalayaasheenna Yakima Neighborhood Health Services waxay awoodi doonnaan in ay kaa caawiyaan go'aaminta xaq-u-yeelashada iyo kharashaadyada laga jari karo.

| Shakhsiyadka qoyska/guriga | Dakhliga bil kasta | Dakhliga sannad kasta |
|----------------------------|--------------------|-----------------------|
| 1                          | \$3,220            | \$38,640              |
| 2                          | \$4,355            | \$52,260              |
| 3                          | \$5,490            | \$65,880              |
| 4                          | \$6,625            | \$79,500              |
| 5                          | \$7,760            | \$93,120              |
| 6                          | \$8,895            | \$106,740             |
| 7                          | \$10,030           | \$120,360             |
| 8                          | \$11,165           | \$133,980             |

